

Waalidiinta ama Masuuliyiinta Mutadawiciinta Da'da yar ee Qaaliga ahoow,

Waad ku mahadsan tahay inaad wiilkaaga ama gabartaada ka taageertay hawsha la xariirta inay noqdaan Mutadawac da' yar. Waxaan jeclaan lahaa inaan kula wadaago xog la xariirta Barnaamijka Mutadawacnimada ee Dadka Da'da yar.

Mutadawiciinta Barnaamijka Mutadawacnimada ee Dadka Da'da yar wuxuu gacan ka qabtaa dhowr meelood oo kamid ah waaxaha isbitaalka: u geynta cuntooyinka yaryar hooyooyin markaas dhalay; keenista ubaxyo iyo boostada, sameynta xargaha bustayaasha; agabyada suuqa, nadiifinta qalabka fudud, gacan ka geysashada waajibbaadyada wadaadnimada iyo kala qaybqaadashada bukaanada hawlaha sida Bingo.

### **Jadwalka Barnaamijka Mutadawacnimada Dadka Da'da yar**

- Isniinta ilaa Jimcaha, 4:00-7:00 PM inta lagu jiro sanad dugsiyeedka
- Isniinta ilaa Jimcaha, 3:00-6:00 PM inta lagu jiro xagaaga

### **Jadwalka Isbadelada**

Mutadawiciinta Da'da yar waxaa laga filayaa ay hawlaha mutadawacnimada u wajahaan sida xirfad shaqo oo ay waayo aragnimo ka helayaan. Haddii mutadawac uusan awoodin inuu shaqeeyo xili gaar ah oo loo qoondeeyay, waxaa laga rabaa inuu la xariiro Kormeerihisa sida ugu dhaqsiiyaha badan ee macquulka ah.

- Mutadawiciintu waxay iska saari karaan jadwalka muddo 48 saacadood ka horeysa xiliga la rabay inay shaqada soo galaan. Waa inay sidaan sameeyaan sida ugu dhaqsiiyaha badan marka ay oggaan inaysan shaqeyn karin xiliga uu jadwalkooda shaqada sheegaayo. Haddii aad dooneyso inaad shaqada ka joogto daqiiqadaha ugu dambeeya fadlan la xariir Xafiiska Adeegga Mutadawacnimada (320) 255-5638 ama [volunteer@centracare.com](mailto:volunteer@centracare.com)
- Maqnaanshaha, daahitaan, ka tagista shaqada waqti hore ama shaqeyn la'aan waxay keeni doontaa in qofka laga qaado tallaabo edbin oo ay kujirto in barnaamijka laga saaro. Haddii Mutadawac Da' yar uu doonaayo inuu barnaamijka iska casilo, asaga/ayada waxaa lagarabaa inay ogeysiis iscasilaad 2-asbuuc kahor usoo gudbiso Kaaliyaha Barnaamijka Mutadawacnimada.
- Mutadawaca Da'da yar wuxuu qaadan karaa fasax maqnaansho oo dhan ilaa 12 billood oo laga bilaabaayo maalinta ugu dambeysay ee uu sameeyay hawsha mutadawacnimada ah. Fasaxa maqnaanshaha ayaa la qaadan karaa marka ay jirto xaalad degdeg ah oo qoys, dalxiis, sababo caafimaad ama marka hawlo ka jiraan dugsiga. Codsiyada lagu doonaayo fasaxa maqnaanshaha waa in lagala hadlo Kaaliyaha Barnaamijka Mutadawacnimada ugu yaraan 2 asbuuc kahor taariikhda qofku doonaayo in fasaxa la siiyo. Ma damaanad qaadi karno inay banaanaan doonto isla shaqadaas mutadawacnimada kadib marka aad kasoo laabato fasaxa maqnaanshaha.
- Si loo dhowro bukaanada isbitaalka, shaqaalaha, mutadawiciinta kale, iyo ayaga; fadlan ogsoonoo in wiilkaaga ama gabartaada laga doonaayo inay la xariiraan Adeegyada Caafimaadka Shaqaalaha (Employee Health Services, EHS) kahor inta aan la gaarin taariikhdooda xigta ee mutadawacnimada haddii ay xanuunsanaayeen/bukeen/la-talin ugu tageen dhakhtarkooda sababahaan soo socda oowgood: caabuuq maqaar, caabuuq neefmareenka, caabuuq il, qandho, shuban, dhidid habbeenkii ka yimaada, murgacasho/xanuun, ama jadniin laf. Xanuunka kugu sababaaya inaad tagin shaqada 2-jeer waa in loo qaato oggolaanshaha EHS.

### **Cuntooyinka iyo Cunnada yaryar**

- Mutadawiciinta Da'da yaryar waxaa la siiyaa gunno cunto oo ah \$10.25 mar kasta oo ay shaqada soo galaan.

### **La xariirista wiilkaaga/gabartaada kujirta isbitaalka gaar ahaan marka xaalad degdeg ah jirto**

- Wac (320) 251-2700 kadibka ka codso shaqaalaha caawimaad.
- Marka ay jiraan xaalado aan ahayn kuwo degdeg ah wac (320) 255-5638 si aad u hesho caawimaad
  - Fadlan ogsoonow sababo la xariira heerka shaqada ee goobaha dadwaynaha ee isbitaalka iyo badqabka bukaanada, mutadawiciinta ma adeegsan doonaan taleefoonka gacanta ama aalado kale oo elektaroonig ah guud ahaan inta shaqada ay kujiraan.

### **Nooca Dharka La rabo**

Waxaa la iska rabaa dhar nadiif ah, habboon, oo si fiican loo daryeelay waxaana kujira:

- Unifoomka qaybta kore ee jirka (oo uu bixiyay St. Cloud Hospital)
- Surwaalada casriga ah ama surwaalada dumarka ee ku dhegan
- Goono si buuxda u le'eg
- Sharabaadyo iyo kabo uusan suulku muuqan
- Kaarka Aqoonisga St. Cloud Hospital\* oo lagu xirto qaybta ka horeysa cumaacunta, sawir muuqda oo nadiif ah (oo aan lahayn daldalool ama wax ku dhegan ama waxyaabo kale oo lagu qurxiyay)

### **Dharka aan Habboon Waxaa kamid ah:**

- Kabaha Saandalka ah
- Kabaha suulasha leh iyo kabaha suulashoodu furan yihiin
- Goonooyinka/Dharka gagaaban ee ka sareeya jilibka
- Surwaalada gagaaban
- Surwaalada khafiifka ah/surwaalada jimicsiga/buumaha qofku ku dhegan/surwaalka jileeca ah ee la jidjiidma
- Shaati aan lahayn gacmo dhaadheer, ilaa in lala xiranaayo maahee unifoom leh gacmo dhaadheer
- Timuhu waa inay leeyihiin midabkooda dabiiciga ah
  - Waxyaabaha lagu qurxiyo timaha sida baalasha timaha, ubaxyo, ama marada dhididka lagu qalajiyo lama oggola in la xirto
- Halkii dhegba wax ka badan 2 dhego-dhego lama gashan karo wa kabadan
- Qalabka jirka lagu xirto oo aan ka ahayn birta sanko la gashto
- Isticmaalida waxyaabaha carafta leh
- Cidiyaha sameyska ah

\*Fiiro gaar ah: Kaarka Aqoonsiga iyo Unifoomku waa hanti uu leeyahay St. Cloud Hospital waana in dib loo soo celiyo kadib marka laga tagaayo shaqada mutadawacnimada ah.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan haka meermeerin inaad lasoo xariirto Xafiiska Mutadawacnimada. Waxaan rajaynaynaa inaan la shaqeyno wiilkaaga ama gabartaada inta ay shaqada mutadawacnimada ah ka sameynayaan St. Cloud Hospital!

Mary Anderson

Kaaliyaha Barnaamijka Mutadawacnimada